



**Federal Republic of Somalia**  
Office of the President

**SHARCI Lr. 23**

Taariikh: 27/06/2016

**ANSIXINTA SHARCIGA LAGU DHISAYO MAXKAMADDA DASTUURKA**

**MADAXWAYNAHA J.F.S,**

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Farqadda 1aad, Xarafka 'C' iyo Farqadda  
2aad ee Dastuurka J.F.S

MARKUU ARKAY: Qodobada 105aad, Farqadda 2aad, 109B iyo 109C Dastuurka J.F.S

MARKUU ARKAY: Warqadda ansixinta ee soo gudbiyay Xafiiska Guddoonka  
Lr. 1301/3/1/9/16 ee 11/06/2016

MARKUU TIXGELIYAY; In ay muhiim tahay in la dhiso Maxkamadda Dastuurka si loo  
dardargeliyo howlaha garsoorka dastuurka iyo maamulwanaagga dowladeed

**Waxuu soo saaray ansixinta Sharcigan:**

**Qodobka 1**

Laga billaabo markii uu Madaxwaynaha saxiixo ansixintan, waxaa la oggolaaday Dhismaha Maxkamadda Dastuurka.

**Qodobka. 2aad**

Waxaa khasab ku muwaadan kasto ee jooga gudaha iyo dibadda inuu ilaaliyo Sharcigaan.

**Qodobka 3aad**

Waxa uu sharcigan Dhaqangelayaa isla maalinta uu Madaxwaynaha J.F.S saxiixo waxaana la baabi'iyay sharci iyo xeer kasto ee ka soo horjeedo waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

Muqdisho 27/06/2016



**Madaxwaynaha J. F.S**  
**Mud.ne Xasan Sheekh Maxamuud**



Ref: 1304/3/1/9/16:الرقم

Mogadishu, 11<sup>th</sup> June 2016 التاريخ

Ku: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya  
Muqdisho.

Ku: R/Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya  
Muqdisho.

Og: Wasaaradda Cadaaladda.  
Muqdisho.

Og: Garyaqaanka Guud ee Dawladda.  
Muqdisho.

Og: Hanti-Dhowrka Guud ee Dawladda.  
Muqdisho.

Og: Guddiga Garsoorka, Awqaafta iyo Arrimaha Diinta  
L/H. Golaha Shacabka

Og: Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka  
L/. Golaha Shacabka.

Og: Agaasimaha Waaxda Shuruucda  
L/H. Golaha Shacabka

Ujeedo: Ansixinta Sharciga Lagu Dhisayo Maxkamadda Dastuurka

M.ne Madaxweyne;

Waxaan kugu wargelinayaa inuu Golaha Shacabka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya go'aan ka gaaray ansixinta Sharciga Lagu Dhisayo Maxkamadda Dastuurka oo halkan ku lifaaqan, wuxuuna Golaha Shacabka Kalfadhiga 8aad ee Fadhiigisii 16aad ee 11<sup>ka</sup> Juun 2016 oo ka dhacay Xaruntiisa Caasimadda Jamhuuriyadda ee Muqdisho ku ansixiyey cod furan oo u dhacay sidatan hoos ku xusan:

- Xildhibaan Oggolaadeen: 147 (Boqol Afartan iyo Toddobo) Xildhibaan.
- Xildhibaan diidey: 2 (Laba) Xildhibaan.
- Xildhibaan ka aamustay 0 (Saddex) Xildhibaan.

Haddaba, M.ne Madaxweyne waxaan si waafaqsan Qodobka 90-aad xarafka (f) ee Dastuurka JFS kaaga codsanaynaa in aad go'aanka Golaha ku oggolaato Xeer-Madaxweyne, si uu Sharci u noqdo looguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda si waafaqsan Qodobbada 84-aad iyo 85-aad ee Dastuurka JFS.

Anigoo huba in waajibkaaga Dastuuriga aad ka gudan doonto, waxaad magaca Golaha Shacabka nooga guddoontaa salaam diiran iyo qaddarin gaar ah.

M.ne Muxammad Sh. Cusmaan "Jawhari"  
Guddoomiyaha Golaha Shacabka



MJ/AM

Tell: +252 612224442/ +252 615577472


E-mail. [speaker@sfp.so](mailto:speaker@sfp.so)

Website: [www.sfp.so](http://www.sfp.so)

**ANSIXINTA SHARCIGA LAGU DHISAYO MAXKAMADDA  
DASTUURKA.**

**Guddoomiyaha Baarlamaanka JFS**


Tirada Xubnaha Codeysay 149: Oggol (147) Diidmo (2) ka aamustay (0)



Saxiix: M. ne Muxammad Sh. Cusmaan "Jawaari"

Taariikh: 11<sup>th</sup> June 2016

**Guddoomiye ku-xigeenka 1aad- Baarlamaanka JFS**



Saxiix: M. ne Jeylaani Nuur likar

Taariikh: 11<sup>th</sup> June 2016

**Guddoomiye ku-xigeenka 2aad- Baarlamaanka JFS**

Saxiix: M. ne Mahad Cabdalla Cawad


Taariikh: 11<sup>th</sup> June 2016



Goisaha Shacabka Federaalka  
ee Jamhuuriyadda Soomaaliya

Guddiga Garsoorka, Awqaafta & Arrimaha Diinta

Judiciary, Religious Sites and Religion Affairs Committee



مجلس الشعب الفيدرالي  
لجمهورية الصومال

لجنة العدل والأوقاف والشؤون الدينية

Tar: 04/11/2015

**Warbixinta Guddiga Garsoorka, Awqaafta iyo Arrimaha Diinta ee Hinise  
Sharciyeedka Maxkamadda Dastuurka**

Ku: Guddoomiyaha Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya

=Muqdisho=

**Ujeedo: Warbixin la xiriiirta Dib u eegis Hindise Sharciyeedka lagu Dhisaayo  
Maxkamadda Dastuurka ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya**

**Mudane Guddomiye,**

**Mudanayaal,**

Guddiga Garsoorka, Awqaafta iyo Arrimaha Diinta waxaa sharaf u ah in uu idiin soo gudbiyo warbixintan ku saabsan mowduuca ujeedada kor ku xusan, iyadoo la tixraacayo Qodobka 68 (3) ee Dastuurka iyo Qodobada 61 iyo 62 ee Xeer-hoosaadka Golaha Baarlamaanka Federaalka, Guddiga wuxuu dib-u-eegis ku sameeyay Hindise Sharciyeedkaas oo ay *Wasaaradda Garsoorka, Awqaafta iyo Arrimaha Diinta* u soo gudbisay Golaha Shacabka taarikhidu marka ay aheed 25/5/2013.

Waxaa 30/5/2013 akhrinta kowaad ee Hindise Sharciyaadka lagu dhisayo Maxkamadda Dastuurka ka hor akhriyay Golaha Shacabka hortiisa Wasiirka Wasaaradda Garsoorka, Awqaafta iyo Arrimaha Diinta, Mudane Xil. Cabdullahi Abyan Nuur.


Si waafqsan Qod.45 (1) ee Xeer Hoosaadka Golaha Shacabka, Guddoonka Golaha Shacabka wuxuu u soo gudbiyay Guddiga Hindise Sharciyeedkaas isla taarikhda 30/5/2013 si uu dib u eegis iyo latashi ula sameeyaan qaybaha si tooska ah u khuseeyo hindise sharciyeedka.

Sidoo kale, si waafasan Qod. 45 (2) ee Xeer Hoosaadka Golaha Shacabka, Guddigu wuxuu bilaabay in uu Qodob qodob uga doodo ugana baaraandego Hindise Sharciyeedka isagoo ka eegayay nuxurka, qaabka iyo sida uu u waafaqasanyahay Dastuurka. Hase ahaatee, hindise sharciyeedkaas wuxuu ahaa mid aad u kooban una baahan in la tayeeyo laguna daro qodobo badan oo lagama maarmaan u ah hawlaha Maxkamadda Dastuurka. Iyaddoo hawlaha dib u eegista meel fiican u marayaan Guddiga ayaa

+252-615033666/+252-618234567/+252-615519399

Email: [hon.adansadiq@gmail.com](mailto:hon.adansadiq@gmail.com)

Web: [parliament.gov.so](http://parliament.gov.so)



si lama filaan ah waxaa hindise sharciyeedka sihakad oo mudayeesan ugu sameeyay xukuumaddii cusbeed ee markaa la dhisay ee R/Wassare Cabdiwali Sheekh Axmed taariikh 02/01/2014 warqad sumaddeedu tahay Ref: XRW/00748/01/14 si loo magacaabo wasiirada cusub, warbixintana waxaa ku lifaaqan warqad ay xakuumadda usoo qortay Golaha Shacabka ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya .

Guddigu waxaa dib loogu soo celiyay Hindise sharciyeedka 10/12/2014, wuxuna Dib-u-Eegid guud ku sameeyay dhamaan Qodobada sharciga isagoo aan ka bixin ujeedada laga leeyahay Hindise Sharciyeedka. Guddigu wuxuu isbedel ballaran ku sameeyay dhammaana qodobada oo idil dhanka siiqada iyo nuxurka kuna kordhiyay faqrado iyo qodobo cusub oo lagama maarmaan u ah hawlaha Maxkamadda Dastuurka.

Guddigu wuxuu ku soo Kordhiyay Faqrado iyo Qodobado dheeraad ah ee hoos ku qoran:

1. Qodobka 1aad waxaalagu soo kordhiyay faqradda (2) iyo (3);
2. Qodobka 4aad waxaalagu soo kordhiyay faqradda 2 (a, b, c, d, e, f, g, h, i, j, k, l, m);
3. Qodobka 6aad waxaa lagu soo kordhiyay faqradda (2) iyo (3);
4. Qodobka 7aad waxaa lagu soo kordhiyay faqradda (3), (4) (5) iyo (6);
5. Qodobka 9aad waxaa lagu soo kordhiyay faqradda (2), (3), (4) iyo (5)
6. Qodobka 10aad ayaa dhamaantiisa lagu soo korhiyay;
7. Qodobka 11aad waxaa lagu soo kordhiyay faqradda (4) iyo (3), (4)
8. Qodobka 12aad ayaa dhamaantiisa lagu soo korhiyay;
9. Qodobka 13aad waxaa lagu soo kordhiyay faqradda (1)(d)(e), (2), (3), (4) iyo (5);
10. Qodobka 14aad ayaa dhamaantiisa lagu soo korhiyay;
11. Qodobka 15aad ayaa dhamaantiisa lagu soo korhiyay;
12. Qodobka 16aad ayaa dhamaantiisa lagu soo korhiyay;
13. Qodobka 17aad ayaa dhamaantiisa lagu soo korhiyay;
14. Qodobka 18aad ayaa dhamaantiisa lagu soo korhiyay;
15. Qodobka 20aad waxaa lagu soo kordhiyay faqradda (3) iyo (4);
16. Qodobka 21aad waxaa lagu soo kordhiyay faqradda (3), (4), (5) iyo (6);
17. Qodobka 22aad ayaa dhamaantiisa lagu soo korhiyay;
18. Qodobka 23aad ayaa dhamaantiisa lagu soo korhiyay;
19. Qodobka 24aad ayaa dhamaantiisa lagu soo korhiyay;
20. Qodobka 25aad ayaa dhamaantiisa lagu soo korhiyay;
21. Qodobka 26aad ayaa dhamaantiisa lagu soo korhiyay;
22. Qodobka 27aad ayaa dhamaantiisa lagu soo korhiyay;
23. Qodobka 28aad ayaa dhamaantiisa lagu soo korhiyay;
24. Qodobka 30aad ayaa dhamaantiisa lagu soo korhiyay;
25. Qodobka 31aad ayaa dhamaantiisa lagu soo korhiyay;
26. Qodobka 33aad ayaa dhamaantiisa lagu soo korhiyay;

Guddigu isagoo xeerinaya Qod.61aad ee Xeer Hoosaadka Golaha Shacabka, wuxuu taariikh 3-4 Bisha November 2015, kulan wadatashi ah la qaatay Wasiirka Wasaaradda Garsoorka, Mudane Cabdullahi Jama, Wasiir Ku-xigenka Xil. Fahmo Axmed Nuur, Xeer-Ilaaliyaha Qarank, Mudane Dr. Axmed Cali Dahir iyo khubaro kale oo ka socda Wasaaradda Garsoorka kassoo ay soo gudbiyeen talooyinkooda ku saabsan Hindise Sharciyeedka Maxkamadda Dastuurka iyadoo talooyinkaasi lagu kordhiyay hindise sharciyeedka. Waxaa koobjoog ka ahaa Wasiirka Wasaaradda Garsoorka ee Dawladda Goboleedka Puntland, Mudane: Saalax Xabiib Jaamac. Guddigu inta uu guda jiray dib u eegista wuxuu safar aqoon korarsi ku sabaabsan Hindise Sharciyeedka Maxkamadda Dastuurka u aaday Kigaali ee dalka Ruwanda inta u dhexeysay 19-22 bishi Febbaryo 2015 kasoo khubaro ku xeel dheer sharciga oo isugu jira ajanabi iyo Soomali ku siiyeen casharo isbarbardhigidda maxkamadaha dastuurka ee wadamo badan.


Hadaba, Guddigu wuxuu guud ahaan ku sameeyay wax kabadel Hindise Sharciyeedka la horkeenay boqolkiiba todobaatan (70%) oo isugu jira dhanka nuxurka, siiqada iyo Qodobo cusub oo lagu soo kordhiyay.

Mudane Guddoomiye, waxaa halkan ku lifaaqan nuxurka Hindise Sharciyeedka.

Mahadsanid.

**Aadan Sadiq Maxamed**

**Guddomiyaha Guddiga**



---

---

+252-615033666/+252-618234567/+252-615519399

Email: [hon.adansadiq@gmail.com](mailto:hon.adansadiq@gmail.com)

Web: [parliament.gov.so](http://parliament.gov.so)



Ref: XRW/GB/ 00.256/05/13

Maalinta: 17/05/2013

**KU: Guddoomiyaha baarlamaanka Federaalka J. F. S.  
Muqdisho.**

**Ujeedo: Gudbin Qabya-Qoraal Xeerar kala duwan.**

Mudane Guddoomiye waxaan halkan kuugu soo gudbinyaa qabyo-qoraal hindise sharciyeedyo ku saabsan arrimo kala duwan. Waxayna kala yihiin:

- 1- Hindise Sharciyeedka Golaha Adeegga Garsoorka.
- 2- Hindise Sharciyeedka Dhismaha Guddiga Xaduudaha iyo Federaalka.
- 3- Hindise Sharciyeedka Guddiga Xuquuqda Aadanaha.
- 4- Hindise Sharciyeedka Dhismaha Xafiiska Gardoonka/ Ilaaliyaha Dadweynaha.
- 5- Hindise Sharciyeedka Guddiga Dib-u-eejidda iyo Hirgelinta Dastuurka.
- 6- Hindise Sharciyeedka Dhismaha Maxkamadda Dastuurka.
- 7- Hindise Sharciyeedka Shaqada Arrimaha Dibadda.
- 8- Hindise Sharciyeedka La-dagaalanka Argagixisada.

Mudane Guddoomiye, Waxaan si sharaf leh kaaga codsanaynaa meelmarinta hindise sharciyeedyadan kor ku xusan, maadaama baahi weyn loo qabo ku-dhaqankooda marxaladan hadda dalku ku sugan yahay.

Warqaddaan waxaa ku lifaaqan dhammaan sideed (8) Hindise Sharciyeed.

Wada-shaqayn wacan

Mudane Cabdi Faarax  
Ra'iisul-Wasaaraha Xukuumadda



JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

Xukuumadda Federaalka

Wasaaradda Garsoorka, & Arr. Diinta, Dasturka,

Dib u heshiisiinta iyo Fedraalka

Xafiiska Wasiirka



جمهورية الصومال  
الحكومة الفيدرالية  
وزارة العدل والشؤون الدينية والدستور  
والمصالحة الوطنية والفدرالية  
مكتب الوزير

The Federal Government of the Somali Republic  
Ministry of Justice, Religious Affairs, Constitution, Federal and Reconciliation  
Office of the Minister

REF:WGADDDHF/XW/D...9/1...2.0.6.../2013

Date: 09/03/2013

**KU: Raiisul Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya**

**Ujeedo: Soo gudbin Hindise Sharciyeed.**


Mudane Raiisul Wasaare, Annaga oo fulinayna xilalka wasaaradda, dhaqan gelinta Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya iyo qorshaha la xiriira dib u habayn Garsoorka oo aan tiigsanayno iyo Faridda Dastuurka ayaan kuu soo gudbinaynaa hindise Sharciyeedka hoos ku qoran oo kala ah:

**Sharciga dhismaha Maxkamadda Dastuurka:** waxaà xusaya Qod. 109B iyo 109C ee Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. Waxay ku jirtaa qaabdhismedka cusub ee Garsoorka, waxaana haboon inay la hawlgasho hay'adaha Garsoorka cusub oo sharcigooda horay loo gudbiyay.

Mudane, Raiisul Wasaare, waxaan filaynaa inay munaasib tahay soo gudbinta sharcigan, sidaas daraadeed waxaan kaa codsanaynaa inaad Golaha Wasiirrada u bandhigto, haddii aad nagu raacdo.

Naga guddoon salaan wacan

Xildh. Cabdullaahi Abyan Nuur  
Wasiirka Wasaaradda



Tel: +252615572274, Email. justicesom@hotmail.com



**Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya**

**SHARCIGA LAGU DHISAYO MAXKAMADDA  
DASTUURKA**

Sharci Lr: \_\_\_\_\_ ee \_\_\_\_\_  
Sharciga lagu dhisay Maxkamadda Dastuurka

**Cutubka Kowaad:**

**Qodobbo Guud**

**Qodobka 1aad:**

**Dhismaha Maxkamadda Dastuurka**

1. Iyadoo laga ambaqaadayo Qodobka 105 (1) ee Dastuurka Federaalka waxaa Sharcigan lagu dhisay Maxkamadda Dastuurka si waafaqsan Qod.109B ee Dastuurka Jamhuuriyada Federalka Soomaaliya.
2. Maxkamadda Dastuurka waxa sharcigan lagu siiyay awoodda fasiraadda Dastuurka oo kama dambeyska ah, go'aan ka gaarista khilaafaadka, xilalka iyo awoodaha u dhexeeya hay'adaha dastuuriga ah ee Dowladda Federaalka, Dowladaha xubnaha ka ah Dowladda Federaalka iyo dhaqangelinta sareynta Dastuurka.
3. Maxkamadda Dastuurka waxay waajibaadkeeda u gudanaysaa si madaxbannaan oo xor ka ah faragelin kaga timaada hay'addaha Dowladda oo heer kasta leh, ama shaqsi amo haya'ad kastoo jiritaan qaanuuni leh.

**Qodobka 2aad:**

**Xarunta Maxkamadda Dastuurka**

Xarunta Maxkamaddu waa magaalada Muqdisho, waxayna awood u leedahay in ay ku qaaddo dacwadaha meel kasta oo dalka ka mid ah.

**Qodobka 3aad:**

**Maqaam sharciyeedka maxkamadda Dastuurka**

Maxkamaddu waa hay'ad garsoor oo madax bannaan, waxayna leedahay shakhsiyad qaanuuneed, waxeyna sameysan karta shaabad iyo astaan u gaarka ah oo isla maxkamaddu go'aamiso.

**Qodobka 4aad:**

**Xilalka iyo waajibaadka Maxkamadda Dastuurka**

1. Maxkamadda Dastuurka waxay yeelanaysaa xilalka iyo waajibaadka ku xusan Dastuurka iyo sharcigan.

2. Iyadoo waxba loo dhimayn Faqradda 1aad ee Qodobkan, Maxkamada Dastuurka waxay yeelanaysaa awoodaha iyo xilalka u gaarka ee hoos ku xusan:
- a. Dastuurinimada sharciyada iyo go'aannada leh awood sharciyeed si ay u xaqiijiso waafaqsanaanta Dastuurka;
  - b. Fasiraadda qodobada dastuurka si waafaqsan nuxurka iyo ujeedooyinkiisa;
  - c. dhageysiga iyo go'aan ka gaarista dacwooyinka ku saabsan sharci-duris si ay u hubiso dastuurnimada shuruucda si waafaqsan Qod 86 aad ee Dastuurka;
  - d. Saleynta eedaymaha iyo Maxkamadeynta la xiriirta fal-dambiyeedyada khiyaano qaran, ku xad-gudbidda Dastuurka iyo sharciyada ee uu ku kaco Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
  - e. Dhageysiga iyo go'aan ka gaarista dacwooyinka soo gaara Maxkamadda Dastuurka oo la xirriira codsi fasiraada Dastuurka oo aan ka soo unkamin dacwad Maxkamadeed;
  - f. Go'aan ka gaarista khilaafaadka Dastuuriga ee u dhexeya Dawladda Federaalka iyo dawlada xubin ka ah Federaalka, ama dawlada xubin ka ah dawladda Federaalka dhaxdooda;
  - g. Dhageysiga iyo go'aan ka gaarista khilaafaadka u dhexeeya laamaha Dawladda federaalka oo ku saabsan awoodaha iyo waajibaadka Dastuuriga ay kala leeyihiin;
  - h. Dhagaysiga iyo go'aan ka gaarista dacwooyinka la xirriira arimaha Dastuuriga ah ee dan guud ee dadweynaha iyo Qaadista dacwadaha sharciga ah haddii muwaadin soomaaliyeed meel looga dhaco xaqiisa dastuuriga ah;
  - i. Baabi`inta xeerka, qodobka, go'aanka iyo hawl kasta ee khilaafsan Dastuurka;
  - j. Kala saarista iyo ku dhawaaqidda natiijadda kama danbeysta ah ee doorashooyinka haddii la isku qabto;

- k. Wixii kale ee dastuurku ama sharci kale u xilsaaro;
- l. Maxkamadda Dastuurka waxay kaloo awood u leedahay go'aan ka gaarista weydiimaha ku saabsan fasiraad Dastuuriga oo uga yimaada maxkamadaha caadiga ah oo la xiriira arrimo Garsoor oo markaa Maxkamadaha horyaala;

#### **Qodobka 5aad:**

##### **Qaab-dhismeedka Maxkamadda Dastuurka**

1. Maxkamadda Dastuurka waxay ka kooban tahay shan (5) Garsoore si waafaqsan Qodobka 109B (1) ee Dastuurka.
2. Maxkamaddu waxay leedahay kaaliyayaal, howlwadeenno iyo shaqaalaha kale ee loo baahdo.

#### **Qodobka 6aad:**

##### **Magacaabista Garsoorayaasha**

1. Musharixiinta Garsoorayaasha Maxkamadda Dastuurka waxaa soo jeedinaya Golaha Adegga Garsoorka waxaana loo gudbinayaa Golaha Shacabka si waafaqsan Qod. 109B (3) ee Dastuurka oo ku ansixinayaa muddo soddon (30) beri gudohood laga bilaabo maalinta soojeedintu soo gaarto Golaha Shacabka. Haddii kalfadhigu xiran yahayna soddon beri gudahood ka bilaabata maalinta kalfadhiga xiga uu furmo.
2. Marka ay jago garsoore ka banaanaato Maxkamadda Dastuurka, Guddiga Adegga Garsoorka wuxuu Musharixiinta u soo gudbinaya Golaha Shacabka oo ku ansixinayo si waafaqsan Farqada 1aad ee Qodobkan.
3. Madaxweynaha JFS wuxuu xeer Madaxweyne ku meel marinayaa musharixiinta uu soo ansixiyey Golaha Shacabka muddo shan iyo toban beri gudohood ka bilaabata maalinta Guddoomiyaha Golaha Shacabka uu u gudbiyo Madaxweynaha JFS.
4. Kulanka guud ee ugu horeeya ee Xubnaha Garsoorayaasha Maxkamadda Dastuurka ay wada goobjoog yihiin waxay iska dhex dooranayaan Guddoomiye iyo Guddoomiye Ku-xigeen si waafaqsan 109B (5) ee Dastuurka Federaalka,

waxaana lagu meelmarinayaa Xeer Madaxweyne si waafaqsan Qobodka 90 (j) ee Dastuurka.

### **Qodobka 7aad:**

#### **Shuruudaha Magacaabista**

1. Qofka loo magacaabayo Garsoore Maxkamadda Dastuurka waa in uu buuxiyaa shuruudaha soo socda:
  - a. In uu yahay Soomaali;
  - b. Da'diisa ka yaraan afartan (40) jir;
  - c. Taarikh-nololeedkiisu ka maran yahay sumcad xumo wax u dhimi karta shakhsiyadiisa, hufnaantiisa ama Madaxbanaanidiisa;
  - d. Inuu leeyahay caafimaad wanaagsan oo u suurtagelineyso gudashada waajibaadkiisa;
  - e. In uu haysto shahaado Jaamacadeed oo la aqoonsan yahay, bartayna Shareecada ama qaanuunka kuna xeel-dheer yahay qaanuunka iyo dastuurka;
  - f. Inuu leeyahay waaya-aragnimo aan ka yareyn toban sano ee xagga sharciga iyo dastuurka;
  - g. In uusan ka mid ahayn xisbi siyaasadeed; iyo
  - h. Aan horay Maxkamad ku xukumin fal dambiyeed lagu muteesan karo ciqaab shantii (5) sano ugu dambaysay.
2. Guddiga Adeegga Garsoorka waa inuu xaqiijiyaa habraaca magacaabista in uu noqdo mid daahfuran una furan ka qayb qaadashada muwaadiniinta buuxiya shuruudaha;
3. Iyadoo waxba loo dhimaynin shuruudaha magacaabista sharcigan ku xusan, waxaa garsoore maxkamadda dastuurka si gaar ah loo magacaabi karaa sharciyahan ku caanbaxay aqoonta qaanuunka, bare sare Jaamacadeed ee kulliyadaha Sharciga, ama qareen ugu yaraan 10 sano ku soo shaqeeyay qareennimo.

## **Qodobka 8aad:**

### **Muddada Xil-haynta Xafiiska Garsoorayaasha Maxkamadda Dastuurka**

1. Muddada xilka Guddoomiyaha iyo Guddoomiye Ku Xigeenka iyo Garsoorayasha Maxkamadda waa 5 (shan) Sano oo hal mar la cusboonaysiin karo.
2. Guddoomiyaha iyo Guddoomiye Ku-Xigeenka Maxkamadda waxaa iska soo dhex dooranaaya shanta garsoore ee Maxkamadda, kuwaas oo go'aankooda u gudbinaya Golaha Adeegga Garsoorka kadibna Madaxwaynaha ayaa magacaabistooda ku meelmarinaaya xeer Madaxweyne;
3. Guddiga Adeegga Garsoorka iyo Golaha Shacabka waa in ay xaqiijiyaan in musharaxa bedelaya garsooraha xilhayntiisu dhammaatay habraaca magacaabista musharaxa cusub la dhamaystiro ugu yaraan seddax bilood ka hor inta aysan dhammaan muddada xilhaynta garsooraha la bedelaayo. Hadii kalfadhiga Golaha Shacabku xiran yahayna magacabista musharaxa cusub lagu dhamaystiro soddon (30) beri gudahood ka bilaabata maalinta kalfadhiga xiga furmo.
4. Garsoore xilka iska casilaaya inta uusan shaqada ka tegin waa in uu seddax bilood ka hor istiaqalo qoraal ah u gudbiyaa Guddoomiyaha Maxkamadda Dastuurka iyo Madaxweynaha JFS. Habraaca magacabista Garsooraha lagu bedelaayo waa in lagu dhamaystiraa muddada seddexda bilood gudaheed ka bilaabata taariikhda istiaqaladda xil ka degidda.
5. Marka Garsooraha Maxkamadda Dastuurka xilka laga qaado ama uu geeriyoodo, Guddiga Adeegga Garsoorka iyo Golaha Shacabka waa in ay ku soo magacabaan seddex bilood gudaheed Garsooraha beddelaya xubinta xilka laga qaaday ama geeriyooday ka bilaabata taariikhada garsoorahu xilka laga qaaday ama geeriyooday.
6. Marka Garsoore Maxkamadda Dastuurka ay ka dhamaato muddada xil-haynta xafiiska, ama uu gaaro da'da hawlgabka sharcigu tilmaamay, ama uu xilka iska casilo, wuxuu xilka sii haynayaa ilaa iyo inta laga soo magacaabay garsoorihii bedeli lahaa si waafaqsan Faqradda 3aad, 4aad iyo 5aad ee Qodobkan.

## **Qodobka 9aad:**

### **Dhaarta**

Marka la magacaabo dhammaan Garsoorayaasha Maxkamadda Dastuurka, inta aanay xilkooda qaban ka hor, waxay Madaxweynaha JFS hortiiisa ku marayaan dhaarta soo socota:

“Waxaan ku dhaaranayaa magaca Ilaahay inaan xilkayga u gudanayo si daacad ah oo danta dalka, dadka iyo diinta ku jirto, dhawrana Dastuurka Qaranka iyo shuruucda kale ee dalka u yaalla.”

## **Qodobka 10aad:**

### **Xasaanadda Garsoorayaasha Maxkamadda Dastuurka**

1. Garsooraha Maxkamadda Dastuurka lagama qaadi karo xilka Garsoornimada intaaysan dhammaan muddada xilhayntiisa ka hor aan ka aheyn go'aan anshaxmarin waafaqsan Qododka 1aad ee sharcigan ama iskiisa xilka iska casilo.
2. Garsooraha Maxkamadda Dastuurka laguma oogi karo Dacwad madani ah ama mid ciqaabeed oo ka dhalata fal la xiriira xil gudashadiisa garsooreenimo.
3. Garsooraha Maxkamadda Dastuurka lama baari karo qofnimadiisa ama hoygiisa iyadoo aan ogolaansho laga haysan Golaha Adeegga Garsoorka.
4. Garsooraha Maxkamadda Dastuurka lama xiri karo, lagumana soo rogi karo xayiraad xoriyadda qofnimadiisa iyadoo aan ogolaansho hore laga haysan Golaha Adeegga Garsoorka aan ka ahayn marka garsooraha lagu qabto isagoo gacmaha kula jira fal dambiyeed xirtaankiisa khasab yahay.

## **Qodobka 11aad:**

### **Waxyaabaha ka reeban Garsooraha Maxkamadda Dastuurka**

1. Garsooraha Maxkamadda Dastuurka waxaa ka reeban:
  - a. Inuu iska diiwaangeliyo xisbi Siyaasadeed ama.
  - b. Xubin ka noqda Xakuumadda Federaalka ama Laanta Sharcidejinta ee Dawladda Federaalka ama xubin ka noqda Dowladaha xubin ka ah Federaalka.

- c. Inuu ka qeyb qaato hawl kasta oo wax u dhimi karta heybadda iyo Madaxbanaanida xilka Garsoore Maxkamadda Dastuurka.
2. Garsooraha Maxkamadda Dastuurka ma qaban karo jago ama masuuliyada kale oo aan ka ahayn xubinnimadda maxkamadda Dastuurka.

### **Qodobka 12aad:**

#### **Xilka Qaadista Garsooraha Maxkamadda Dastuurka**

1. Garsooraha Maxkamadda Dastuurka inta uusan gaarin da'da howlgabnimada waxaa xilka looga qaadi karaa oo keliya shuruudaha soo socda:
  - a. Haddii ay ku timaado geeri;
  - b. Haddii garsooruhu si qoraal ah ku caddeeyo inuu iska casilo garsoorenimada lagana ogolaado;
  - c. Haddii maxkamadi xukun kama dambays ah ku gaarto in uu galay dembi ka hor-istaagi kara in uu qabto shaqo dawladeed ama adeeg bulsho
  - d. Haddii Golaha Adeegga Garsoorka uu ka soo saaro go'aan anshax marin kama dambays ah uuna soo jeediyo in xilka garsoorenimada laga qaado;
  - e. Caafimaad darro jireed ama maskaxeed oo soo caddeeyeen guddi takhaatiir oo la aqoonsan yahay; iyo
  - f. Dhaqan anshax xumi baahsan.
2. Qof kasta wuxuu u soo gudbin karaa Guddiga Adeegga Garsoorka cabasho ka dhan ah Garsooraha Maxkamadda Dastuurka si waafaqsan xaaladaha lagu xusey Faqradda 1aad ee qodobkan.
3. Haddii Guddiga Adeegga Garsoorka oo uu u arko in eedeymahu leeyihiin mudnaan, Guddiga Adeegga Garsoorka wuxuu magacaabayaa guddi gaar ah (tribunal) oo ka kooban ugu yaraan saddex Garsoore si ay u baaraan go'aana kaga gaaraan eedeymahaas.
4. Haddii Maxkamaddu ay go'aan ku gaarto in mid kamid ah eedeymaha ku xusan Faqradda 2aad ee Qodobkan uu yahay mid sugan, Maxkamadu waxay talooyinkeeda u gudbinaysaa Golaha Adeegga Garsoorka.

5. Markuu Golaha Adeega Garsoorka xilka ka qaado Garsooraha Maxkamadda Dastuurka, waxaa xilka qaadistiisa rasmi ahaan lagu meelmarinayaa xeer Madaxweyne.

#### **Qodobka 13aad:**

##### **Diiwaanhayaha iyo Hawlwadeennada kale ee Maxkamadda Dastuurka**

1. Maxkamadda Dastuurka waxay yeelanaysaa Diiwaanhaye, Kaaliyaal Diiwaanhaye, iyo hawlwadeenno maamuleedka lagama maarmaan u ah habsami u socodka howlaha Maxkamadda.
2. Diiwaanhayaha xilalka iyo howlaha uu fulinaayo waxaa lagu qeexayaa Xeer-hoosaadka Maxkamada Dastuurka.

#### **Qodobka 14aad:**

##### **Awoodda Maxkamadda Dasturka**

1. Maxkamadda Dastuuriga waxay awood u leedahay go'aaminta dasturnimadda shuruucda iyo axkaamta kale oo leh awood sharciyeed si waafaqsan Qodobada 86 (3) (4), 109B iyo 109C ee Dastuurka.
2. Maxkamadda marka ay go'aamineyso Dasturnimada shuruucda waxay eegeysaa oo keliya in qaabka, nuxurka iyo dulucda arrinta ay ka go'aan gaareyso waafaqsan yihiin Dastuurka iyadoo wax qiimeyn ah siineynin arrimaha Siyaasadeed ee la xirriira si waafaqsan Qodobka. 1 (2) ee Xeerka Nidaamka Garsoorka Lr. 2 ee 12 June 1962.

#### **Qodobka 15aad:**

##### **Duridda Sharci heer Federaal**

1. Sharci habraaca ansixinta Baarlamaanka Federaalka iyo dhaqangelidaba maray waxaa lagu duri karaa oo keliya in uu ka soo horjeedo Dastuurka, waxaana qoraal ahaan Maxkamadda Dastuurka usoo gudbin kara:
  - a. Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka, isagoo isu dhan ama ergo hal dawlad xubin ka ah dawladda Federaalka;
  - b. Sedex meelood meel xubnaha Golaha Shacabka Federaalka

- c. Golaha Wasiirada Federaalka;
  - d. Ugu yaraan 10,000 (toban kun) muwaadin codbixiyaal diiwaan gashan.
2. Madaxweynaha Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya oo keliya ayaa codsan kara duridda iyo dib u eegista Hindise Sharciyeed labada Gole ama Gole ka mid ah Baarlamaanka Federaalka soo ansixiyey si loo hubiyo waafaqsanaantiisa Dastuurka.
  3. Marka la gunaanado dhegeysiga dacwada sharci duridda kadib, afar usbuuc gudahood ayey Maxkamadda Dastuurka go'aan ka soo saareysaa Dastuurnimada Sharci heer Federaal oo la soo duray, haddii aysan jirin xaalado sababaya in loo baahan yahay muddo ka badan afar isbuuc;
  4. Haddii Maxkamadda ay go'aamiso in Sharci heer Federaal ah dhammaantiisa ama Qodobbo ka mid ah aysan waafaqsaneyn Dastuurka, Maxkamadda Dastuurka waxay go'aankeeda u gudbineysaa Baarlamaanka Federaalka si ay dib ugu baarandegaan una waafajiyaan Dastuurka;
  5. Sharci heer Federaal ah ma ansaxayo iyadoo aan la sixin Qodobbada aan waafaqsaneyn Dastuurka oo ay Maxkamadda Dastuurka tilmaantey.

### **Qodobka 16aad:**

#### **Durid Sharci heer Maamul Goboleed ama Dowlad Goboleedyada**

1. Sharci maray habraaca ansixinta laanta sharcidejinta Maamul Goboleed ama Dawlad Goboleed iyo meelmarinta laanta fulintoodaba waxaa lagu duri karaa oo keliya in uu ka soo horjeedo Dastuurkooda iyo Dastuurka Federaalka, waxaana qoraal ahaan Maxkamadda Dastuurka usoo gudbin kara:
  - a. Seddex meelood meel (1/3) xubnaha laanta Sharcidejinta ee Maamul Goboleedka ama dawlad goboleedka xubinta ka ah federaalka arrinta khuseyso.
  - b. Golaha wasiirada ee Xukuumadda Federaalka, ama
  - c. Shan kun muwaadiniin Codbixiyayaal ka diiwaan gashan isla Dowlad goboleedka ay arrinta khuseyso.

2. Marka la gunaanado dhegeysiga dacwada sharci duridda heer Maamul/Dawlad Goboleed kadib, Saddex bilood gudahood ayey Maxkamadda Dastuurka go'aan ka soo saareysaa Dastuurnimada Sharci heer Goboleed oo la soo duray, haddii aysan jirin xaalado sababaya in loo baahan yahay mudada kor ku xusan;
3. Haddii Maxkamadda ay go'aamiso in Sharci heer Maamul/Dawlad Goboleed dhammaantiisa ama Qodobbo ka mid ah aysan waafaqsaneyn Dastuurka Maamul/ Dawlad Goboleed ama Dastuurka Federaalka, Maxkamadda Dastuurka waxay go'aankeeda u gudbineysaa Golaha Sharcidejinta ay khuseyso si ay dib ugu baarandegaan una waafajiyaan Dastuurrada;
4. Sharci heer Maamul/Dawlad Goboleed ma ansaxayo iyadoo aan la sixin Qodobbada aan waafaqsaneyn Dastuurrada oo ay Maxkamadda Dastuurka tilmaantey.

#### **Qodobka 17aad:**

#### **Codsi Fasiraad Dastuurka**

1. Maxkamadda Dastuurka keliya ayaa leh awood Garsoor ku saabsan codsi fasiraad Dastuureed oo aan ka soo unkumin Maxkamadaha, waxaana qoraal ahaan kusoo codsan kara keliya:
  - a. Aqalka sare ee Baarlamaanka Federaalka oo codsigaas ku ogolaadey cod aqlabiyad ah.
  - b. Dowlad Goboleed xubin ka ah Dowladda Federaalka.
  - c. Saddex meelood meel (1/3) Golaha Shacabka Federaalka;
  - d. Golaha Wasiirada ee Xukuumada Federaalka.
2. Codsiga fasiraadda Dastuurka waa:
  - a. In uusan la xiriirin dacwad maxkamad oo weli hortaal.
  - b. Maxkamadda Dastuurka waxay bixineysaa fasiraada Dastuureed toos la xiriirta arrinta la soo weydiyey;
  - c. Waxaa lagama maarmaan ah in fasiraadda Dastuureed ay Maxkamaddu bixineyso ay ahaato mid si cad loo fahmi karo lehna xal go'aaminaya su'aasha Dastuureed oo loo soo gudbiyey.

3. Waa in saddex bilood gudohood Maxkamadda Dastuurka go'aan ka soo saartaa codsiga fasiraada Dastuurka ku xusan Qodobkan kadib marka ay soo dhemeystirto dhegeysiga.
4. Fasiraada Maxkamadda Dastuurka ee ku xusan Qodobkan wuxuu ku waajib noqonaya dhammaan haya'addaha Xukuumada Federaalka iyo Xubnaha dowlad Goboleedyada iyo Maamul Goboleedyada KMG.

### **Qodobka 18aad:**

#### **Dacwadaha la xiriira Dastuurka oo ka soo unkuma Maxkamadda**

1. Si go'aan looga gaaro dacwado horyaal Maxkamadaha ay ka soo ifbaxaan arrimo u baahan fasiraad Dastuureed, Maxkamaduhu waxay fasiraad dastuureed weydiisan karaan Maxkamadda Dastuurka.
2. Haddii dhinacyada dacwada midkood soo jeediyo codsi fasiraad Dastuureed, Maxkamaduhu waxay codsigooda u gudbin karaan Maxkamada Dastuurka.
3. Inta codsiga fasiraadda Dastuureed ee ka yimid dhinacyada loo gudbinin Maxkamadda Dastuurka, Maxkamadda dacwada hortaal waa in ay ku qanacdaa in go'aan ka gaarista dacwada loo baahan yahay fasiraad Dastuureed.
4. Dhegeysiga dacwadda Maxkamadda hortaal waa la hakinayaa taniyo inta Maxkamadda Dastuurka go'aan ka soo gaareyso arrimaha Dastuuriga.

### **Qodobka 19aad:**

#### **Dacwad la Xiriira Xaquuqda Dastuuriga ah**

1. Dacwadda ku xusan Farqadda 1aad ee Qodobkan waxaa Maxkamadda loo soo gudbin karaa oo keliya kadib markii dhammaan haya'adaha Garsooridda ee jira iyo xafiisyada kale ee Maamulka dawladda kala xaqsooridooda lagu qanci waayo.
2. Haddii dacwadaha loo soo gudbinaayo Maxkamadda ay saameyn ku leedahay arrin ku lug leh danta guud ee dadweynaha ama haddii dib u xaqsoorid loogu diro maxkamado kale ay hor iyo horaan dhibaato weyn u keeyneyso danta dacwad oogaha, maxkamaddu ma tixgelineyso shuruudaha ku xusan Faqradda 2aad ee Qodobkan.

### **Qodobka 20aad:**

#### **Dacwooyinka Dastuuriga ah ee la Xiriira Danta Guud**

1. Dacwadaha ku saabsan arrimo Dastuuri ah oo saameyn ku leh danta guud waxaa si toos ah ugu soo gudbin kara maxkamadda Dastuurka, qof kasta, koox kasta, hay'ad kasta, Dawladda Federaalka ama Dawlad Goboleedyada xubnaha ka ah Federaalka.
2. Dacwooyinka ku xusan Farqadda 1aad ee Qodobkan waa in ay si cad u ugu qeexan tahay arrimo Dastuureed iyo danta guud oo ujeedada dacwad oogaha difaacayo.

### **Qodobka 21aad:**

#### **Khilaafaadka u Dhexeeya Xukuumadaha**

1. Maxkamadda Dastuurka waxay awood u leedahay xalinta khilaaf kasta oo ka dhex aloosma Xukuumada Federaalka iyo xukuumadaha xubinta ka ah Dawladda Federaalka, ama Xukuumadaha ka tirsan Dawladda Federaalka dhexdooda, dacwadaas ay soo gudbin karaan dhinac kasta oo ka mid ah dhinacyada kor ku xusan.
2. Khilaafyada ku xusan Farqada 1aad ee Qodobkan waxaa Maxkamadda loo soo gudbin karaa oo keliya kadib marka dhinacyada ay ku dadaalaan in khilaafaadka ku xaliyaan mabda'a Dastuuriga ah ee xiriirka iskaashiga xukuumadeed oo wax-ku-oolka ah.
3. Haddii Maxkamadda aysan garwaaqsan in dhinacyada khilaafka u dhexeeya sameynin dadaal ku filan oo khilaafaadka lagu xaliyo mabda'a xiriirka iskaashiga xukuumadeed oo wax-ku-oolka ah, Maxkamaddu waxay dib ugu celineysaa dhinacyada khilaafka u dhexeeyo si ay u sameeyaan wadaxaajood iyo gorgortan dheeri ah.
4. Maxkamadda Dastuurka waxay Madaxweynaha JFS, Golaha Wasiirada, Labada Aqal ee Baarlamaanka Federaalka iyo Xukuumaddaha Maamul Goboleedyada ku wargelineysaa habraaca dacwadgelidda ku xeerisan qodobkan.

### **Qodobka 22aad:**

#### **Khilaafyada u Dhexeeya Hay'adaha Xukuumada Federaalka**

1. Maxkamadda Dastuurka waxay awood u leedahay dhegeysiga iyo go'aan ka geerista khilaafaadka ka dhex aloosma hay'adaha Xukuumadda Federaalka oo hay'ad ka mid ah soo gudbisay dacwad la xiriirta awoodahooda iyo xilalkooda Dastuuriga ay kala leeyihiin.
2. Khilaafyada ku xusan Farqada 1aad ee Qodobkan waxaa Maxkamadda loo soo gudbin karaa oo keliya kadib marka dhinacyada ay ku dadaalaan in khilaafaadka ku xaliyaan mabda'a Dastuuriga ah ee xiriirka iskaashiga xukuumadeed oo wax-ku-oolka ah.
3. Haddii Maxkamadda ay ku qancin in dhinacyada khilaafaadka u dhexeeya aysan gelinin dadaal ku filan oo meel golaha Maxkamadda ka baxsan ku xalin kareen, waxay dib ugu celineysaa dhinacyada ay khuseeyso khilaafaadka si ay u sameeyaan dadaal dib u xaajood iyo gorgortan dheeraad ah.
4. Maxkamadda Dastuurka waxay Madaxweynaha Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, Golaha Wasiirada, Labada Aqal ee Baarlamaanka Federaalka iyo Guddiga Adeegga Garsoorka ku wargelineysaa habraaca dacwadgelidda ku xeerisan qodobkan.

### **Qodobka 23aad:**

#### **Eedeeynta Madaxweynaha Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya**

1. Xil-ka-qaadista Madaxweynaha Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxaa Maxkamadda Dastuuriga loogu soo gudbin karaa keliya soojeedin (mooshin) ku saldhigan qiyaano qaran ama ku xad gudub culus ee nidaamka Dastuurka ama sharuucda dalka oo ay soo jeediyaan Saddex meelood meel (1/3) tirada guud ee xubnaha Golaha Shacabka Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
2. Soojeedinta (mooshinka) xil ka qaadista ku xusan Farqada 1aad ee Qodobkan waa in ay si cad ugu qeexan yihiin jiritaanka falalka saldhigga u ah eedeymaha lagu sababeeyay xil-ka-qaadista Madaxweynaha.
3. Haddii Maxkamadda Dastuurka ay garawsato in soojeedintu (mooshinka) ku qeexan yihiin kuna dhan yihiin cadeymaha ku xusan Farqadda 1aad iyo 2aad ee

Qodobkan, diiwaanhayaha Maxkamadda Dastuuriga ah wuxuu Madaxweynaha ku wargelinayaa qoraallada, habraaca iyo talaabooyinka loo marayo dhegeysiga dacwadda wuxuuna ka codsanayaa in muddo cayiman oo marna aan ka badnaan karin afar usbuuc haddii aysan jirin xaalado sababaya in waqti dheeraad ah la siiyo.

4. Haddii Madaxweynaha Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya uusan ka soo jawaabin ee deymaha lagu soo oogay mudada ku xusan Farqadda 3aad ee Qodobkan, Maxkamadda Dastuurka waxay gudagaleysaa go'aan ka gaarista soojeedinta (mooshinka) jawaabta Madaxweynaha la'aanteed, haseyeeshee waxay cuskaneysaa dhammaan cadeymaha iyo xogta Maxkamadda heli karto.
5. Maxkamadda Dastuurka marka ay dhameystirto dhegeysiga dacwadda iyo baaritaanka. waxay laba bilood gudahood go'aan ka gaareysaa dhammaan soo jeedimaha la xiriira xil-ka-qaadista Madaxweynaha Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
6. Haddii Maxkamadda ay u cadaato oo ay garwaaqsato in falalka ee deymuhu lagu soo saleeyay ay yihiin kuwo sagan oo si shaki la'aan ah u qiraya in ay jiraan khiyaamo qaran ama ku xad gudub culus nidaamka Dastuurka ama sharuucda dalka, waxaa Madaxweynaha Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya xilka looga qaadi karaa Saddex meelood laba (2/3) xubnaha guud ee labada Aqal ee Baarlamaanka Federaalka.

#### **Cutubka 2aad:**

#### **Habraaca Dacwad Qaadista Maxkamadda Dastuurka**

#### **Qodobka 24aad:**

#### **Habraaca Dacwadaha Maxkamadda**

1. Habraaca dacwad qaadista, dhegeysiga iyo xukun gaarista Maxkamaddu waxaa loo qaadayaa sida ku cad Xeerka Habka Madaniga Soomaaliyeed.
2. Maxkamaddu waxay u yeeri kartaa cid kasta oo ay u aragto inay gacan ka gaysan karto gaarista xukun cadaalad ku dhisan. Sidoo kale waxay dalbi kartaa xog kasta oo wax ka taraysa go'aan ka gaarista dacwadda.

3. Maxkamaddu marka ay dhammeysa dhagaysiga dacwadda waxay soo saaraysaa xukun ku salaysan cod hal-dheeri ah ee garsoorayaasha dacwadda galay, iyadoo ka jawaabaysa dhammaan arrimihii la horkeenay si waafaqsan sharciga dalka.
4. Dhageysiga dacwaduhu waa mid u furan dadweynaha, hase yeeshee Maxkamaddu waxay go'aamin kartaa in dacwadda lagu dhagaysto si qarsoodi ah marka ay jiraan sababo la xiriira ilaalinta sirta qaranka, amaanka ama anshaxa guud.
5. Maxkamaddu waxay dacwadaha ku geleysaa qaab guddi oo ka kooban ugu yaraan guddoomiyaha maxkamadda iyo (2) Garsoore;
6. Dacwadaha culus waxay Maxkamaddu ku gelaysaa xubnaahooda oo dhameystiran;
7. Go'aanka Maxkamaddu waa kama dambays.

#### **Qodobka 25aad:**

##### **Dhaqangalka Xukunnada Maxkamadda**

1. Maxkamadda ayaa yeelanaysa awoodda go'aan ka gaarista waqtiga dhaqangalka go'aankeeda, iyada oo tixgelineysa danta dhinacyada dacwadda ku lugta leh iyo danta guud ee bulshada.
2. Haddii Maxkamaddu buriso sharci ciqaabeed, dhaqangalka xukunkeeda waa inuu ku saleysnaadaa hadba sida dantu ugu jirto eedeysanaha ama xukunsanaha loo cuskaday sharcigaas la buriyay.

#### **Qodobka 26aad:**

##### **Ka Joogsiga Dacwadda iyo Durista Garsooraha**

1. Garsooraha Maxkamadda waa in uu ka joogsado gelidda dacwadda marka ay jirto mid ka mid ah xaaladaha ku xusan Qodobka 29aad Xeerka Habka Madaniga Soomaliyeed.
2. Haddii garsooruhu ka joogsan waayo gelidda dacwadda sida ku xusan Faqrada hore ee Qodobkan waxaa laga gudbin karaa cabasho lagu durayo oo la horgeynayo Guddoominayaha Maxkamadda si uu go'aan uga gaaro.

**Qodobka 27aad:**

**Dacwadaha Waafaqsanaan La'aanta Dastuurka**

1. Dacwadaha waafaqsanaan la'aanta dastuurka waxaa ka soo qayb gelaya, ka sokow dhinacyada ay khusayso, Garyaqaanka Guud ee dawladda iyo Xeer-Ilaaliya Guud ee Qaranka si loo ilaaliyo danta guud ee bulshada iyo ku dhaqanka Dastuurka;
2. Dhinacyada dacwadaha Maxkamadda Dastuurka waxay soo wakiilan qareenno u dooda.

**Qodobka 28aad:**

**Xukunnada Maxkamadda**

1. Maxkamadda, marka la horkeeno dacwad waxay ka soo saareysaa xukun kama dambeys ah oo ay ku caddeyneyso sal lahaanshaha ama sal la'aanta dacwadda.
2. Maxkamaddu waa inay nuqul ka mid ah Xukunka u gudbisaa Madaxweynaha, Afhayeenka Barlamaanka, Guddoomiyaha Aqalka Sare, Guddoomiyaha Maxkamadda Sare, Ra'iisul Wasaaraha, Xeer-Ilaaliyaha Guud iyo Garyaqaanka Guud; iyadoo nuqul kalena la dhigayo kaalinka Maxkamadda si dhinacyada dacwaddu khuseyso loo gaarsiiyo.
3. Dhammaan Xukunnada Maxkamadda waa in lagu soo qoro Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya 30 (soddon) maalmood gudahood, taas oo ka billaabaneysa taariikhda loo gudbiyay Garyaqaanka Guud.

**Cutubka 3aad:**

**Qodobbo Qubane ah**

**Qodobka 29aad:**

**Xeer Hoosaadka**

Iyadoo aan waxba loo dhimeynin Dastuurka, sharcigan ama sharciyada kale ee Federaalka, shirweyne guud ee xubnaha Maxkamadda Dastuurka waxay ku sameysanayaan Xeer hoosaad kaasoo ku ansaxayo marka ay taageerto ugu yaraan Saddex Garsoore ee ka tirsan shanta garsoore ee Maxkamadda Dastuurka.

### **Qodobka 30aad:**

#### **Guntinta iyo Go'aan Gaarista**

1. Haddii uusan si kale u dhigin Dastuurka ama sharcigan, guddiga dhegeysiga ee Maxkamadda Dastuurka wuxuu ku ansaxayaa marka ay joogaan Saddex Garsoore ee ka tirsan shanta Garsoore.
2. Maxkamadda waxay go'aan keeda ku gaareysaa cod aqlabiyad hal dheeri ah ee guddiga garsoorayaasha dhagaysanaya dacwada.
3. Waxaa shir guddoominaya dhegeysiga dacwada Guddoomiyaha maxkamadda Dastuurka, ama ku xigeenkiisa marka uu maqan yahay Guddoomiyaha. Marka guddoominayaha ama ku xigeenka ay maqan yihiin ama aysan awoodin in ay shir guddoomiyaan ama ay bannaan tahay xafiiska Gudoomiyaha iyo ku xigeenkiisa, Maxkamadda waxaa shir guddoominaya Garsooraha ugu da'da weyn.
4. Marka codeynta ay bar-bardhac noqoto, go'aanka wuxuu u dhacayaa dhanka Garsooraha shir guddoominaya uu u codeeyo.

### **Qodobka 31aad:**

#### **Dhegeysiga Dadweynaha**

1. Dhageysiga Maxkamadda Dastuurka waa in uu ahaado mid u furan dhammaan dadweynaha;
2. Haddii danta sharciga ah ee dhinac ka mid ah dhinacyada, dhinac Saddexaad, ama danta guud ay ku jirto, maxkamadda Dastuurka waxay dhageysiga dacwada u sameyn kartaa si qarsoodi ah.

### **Qodobka 32aad:**

#### **Amaro (Go'aano) Ku-Meelgaar-ah**

1. Maxkamadda Dastuurka, marka uu uga yimaado codsi dhinac ka mid ah dhinacyada ama soo jeedin iyada u gaar ah waxay soo saari kartaa amar (go'aan). Haddii go'aankaas lagama maarmaan u yahay ka hortaga dhibaato aan dib loo daaweyn karin;
2. Amarka ku-meelgaarka-ah ee Maxkamadda wuxuu noqonayaa meelmar (dhaqangal) waqti go'an ay Maxkamadda go'amiso kaasoo aan dhaafi karin Lix Bilood oo laga soo bilaabo maalinta amarkaas uu dhaqan galay, Maxkamadda dib ayey u cusboonaysiin kartaa amarka.

**Qodobka 33aad:**

**Ku Xadgudub Maxkamaddeed**

Maxkamadda dastuurka waxay leedahay awood iyo xukun la mid ah kan Maxkamadda Sare ee Federaalka oo ay ku ciqaabi karto qof kasta xadguduba ku sameeya dacwada hortaala Maxkamadda.

**Qodobka 34aad:**

**Miisaniyada sanadeedka**

1. Maxkamadda Dastuurka waxaa loo qoondeynayaa Miisaaniyada sanadeed laguna ansixinayaa habraac Miisaniyada Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
2. Maxkamadda waxay diyaarsaneysaa Miisaniyad Sanadeedkeeda oo qeyb ka ah Miisaniyadda Dawladda iyadoo raaceyso si waafaqsan habraac dejinta miisaaniyada Dawlada Federaalka Soomaaliya

**Qodobka 35aad:**

**Dhaqangalka Sharcigan**

1. Wixii sharcigan laga waayo waxaa loo raacaya Nidaamka Garsoorka Soomalia iyo lifaaqyadiisa oo lagu ansixiyey Xeerka Lr. 3 ee 12 Juunyo 1962.
2. Sharcigani wuxuu dhaqangelayaa marka uu Golaha Shacabka anixiso, Madaxweynaha Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Xeer ku soo saaro isla markaana lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah.

## Tusmo

Cutubka Kowaad: Qodobbo Guud.....	1
Qodobka 1: Dhismaha Maxkamadda Dastuurka .....	1
Qodobka 2aad: Xarunta Maxkamadda Dastuurka .....	1
Qodobka 3aad: Maqaam sharciyeedka maxkamadda Dastuurka .....	1
Qodobka 4aad: Xilalka iyo waajibaadka Maxkamadda Dastuurka .....	1
Qodobka 5aad: Qaab-dhismeedka Maxkamadda Dastuurka.....	3
Qodobka 6aad: Magacaabista Garsoorayaasha.....	3
Qodobka 7aad: Shuruudaha Magacaabista.....	4
Qodobka 8aad: Muddada Xil-haynta Xafiiska Garsoorayaasha Maxkamadda Dastuurka ....	5
Qodobka 9aad: Dhaarta .....	6
Qodobka 10aad: Xasaanadda Garsoorayaasha Maxkamadda Dastuurka.....	6
Qodobka 11aad: Waxyaabaha ka reeban Garsooraha Maxkamadda Dastuurka .....	6
Qodobka 12aad: Xilka Qaadista Garsooraha Maxkamadda Dastuurka .....	7
Qodobka 13aad: Diiwaanhayaha iyo Hawlwadeennada kale ee Maxkamadda Dastuurka ....	8
Qodobka 14: Awoodda Maxkamadda Dastuurka .....	8
Qodobka 15aad: Duridda Sharci heer Federaal.....	8
Qodobka 16aad: Durid Sharci heer Maamul Goboleed ama Dowlad Goboleedyada .....	9
Qodobka 17aad: Codsiga Fasiraad Dastuurka.....	10
Qodobka 18aad: Dacwadaha la xiriira Dastuurka oo ka soo unkuma Maxkamadda .....	11
Qodobka 19aad: Dacwad la Xiriira Xaquuqda Dastuuriga ah .....	11
Qodobka 20aad: Dacwooyinka Dastuuriga ah ee la Xiriira Danta Guud .....	12
Qodobka 21aad: Khilaafaadka u Dhexeeya Xukuumadaha .....	12
Qodobka 22aad: Khilaafyada u Dhexeeya Hay'adaha Xukuumada Federaalka .....	13
Qodobka 23aad: Eedeeynta Madaxweynaha Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya .....	13
Cutubka 2aad: Habraaca Dacwad Qaadista Maxkamadda Dastuurka .....	14
Qodobka 24aad: Habraaca Dacwadaha Maxkamadda .....	14
Qodobka 25aad: Dhaqangalka Xukunnada Maxkamadda.....	15
Qodobka 26aad: Ka Joogsiga Dacwadda iyo Durista Garsooraha.....	15
Qodobka 27aad: Dacwadaha Waafaqsanaan La'aanta Dastuurka .....	16
Qodobka 28aad: Xukunnada Maxkamadda .....	16
Cutubka 3aad: Qodobbo Qubane ah.....	16
Qodobka 29aad: Xeer Hoosaadka.....	16
Qodobka 30aad: Guntinta iyo Go'aan Gaarista .....	17
Qodobka 31aad: Dhegeysiga Dadweynaha .....	17
Qodobka 32aad: Amaro (Go'aano) Ku-Meelgaar-ah .....	17
Qodobka 33aad: ku xadgudub maxkamaddeed.....	18
Qodobka 34aad: Miisaniyada sanadeedka .....	18
Qodobka 35aad: Dhaqangalka Sharcigan.....	18